


DISCOVER
ITS BEAUTY

Qaybta 2aad

# DIINTA AADAM IYO XAAWO

DR. NAJI IBRAHIM



# Hal Farriin oo Kaliya!

Ilaahay (SW) tan iyo abuuritaankii Aadan iyo Xaawa, wuxuu dadka u soo gudbinayey hal diin oo xaq ah oo leh hal farriin oo asal ah, taasoo marar badan loogu celceliyey bani'aadamka. Si loogu amro dadka inay rumeeyaan Allihii Abuuray oo keliya, una caabudaan Ilaahay kaligiis, si loogu xusuusiyo xaqa oo loogu soo celiyo jidka toosan, wuxuu Ilaahay (SW) u soo diray Nabiyo iyo Rusul- badan oo ay ka mid yihiin Aadan, Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise, iyo Muxammad (NNKH). Nabiyadan iyo Rusushaan waxaa loo soo diray inay dadka ku hanuuniyaan isla diinta Ilaahay oo ay gudbiyaan farriintan qura:

**ILAHAHAAGA RUNTA AH, ALLAAH, WAA KALI CAABUD ILAAHAY KELIGIIS.**

Dhab ahaantii, dhammaan Nabiyada iyo Rususha waxay faafiyeen hal farriin oo isku mid ah, sidaa darteed, diintoodu waxay ahayd mid kali ah – Diinta Islaamka!

U hogaansanaanta Ilaahay (SW) waa asaaska farriintooda. Ereygan ***'HOGAANSAMID'*** wuxuu qeexayaa macnaha ereyga Carabiga ah ee ***'ISLAAM'.***

Qur'aanka Kariimka ah wuxuu caddeeyaa in u hogaansamidda Ilaahay, ama ***'Islaamku'*** ay tahay diinta xaqa ah ee Aadan iyo dhammaan Nabiyada iyo Rususha Ilaahay.

Baybalka (Bibiliyada) waxaa ku xusan oraaho badan oo Ciise (NNKH) ku barayo dadka raacsan inay fuliyaan doonista Ilaahay oo ay ilaaliyaan amarradiisa. Sidoo kale, Baybalka wuxuu tilmaamayaa macnaha Islaamka (u-hogaansamidda Allaah) sida hadalkan: ***"Haddaba, naftiinna ha u hoggaansanto Allaah."*** (James 4:7)

Ereyga ***'Muslim'*** wuxuu loola jeedaa qof u hogaansama doonista Ilaaha keliya ee runta ah; sidaas darteed, Muslimiintu waxay si dhab ah u raacsan yihiin Anbiyada Aadan, Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise, Muxammad (NNKH) iyo dhammaan Nabiyada kale.



# Ilaaha Kaliya ee Runta ah ee ku xusan Baybalka Qaybtiisa Hore waa (Old Testament)

***Maqal, Israa'iilow: Rabbigeen ama Allaheen waa hal Rabbi.*** (Deuteronomy 6:4)

***Anigu waxaan ahay Ilaah, Ilaah kalena ma jiro; Anigu waxaan ahay Ilaah, Mana jiro mid ila mida.*** (Isaiah 46:9)


***Ilaahaybaa Weyn, Rabbiga leh awoodda oo dhan! Rabbiyow, mid adiga kuu eg ma jiro, Ilaah kale oo adiga kaa sokow ah ma jiro, sidaan ku maqalnay dhagaheena.*** (2 Samuel 7:22)

***Waa inaad i ogaataa oo i rumaysataa, oo aad garataa inaan anigu ahay Ilaahay. Ma jiro Ilaah iga horreeyey, mid iga dambeeyaana jiri maayo. Anigu waxaan ahay Rabbiga, Ilaah kalena ma jiro.*** (Isaiah 43:10-11)

***Rabbiyow, mid adiga kuu eg ma jiro, Ilaah kale oo adiga kaa sokow ah ma jiro, sida aan ku maqalnay wax kasta oo dhegaheenu maqleen.*** (1 Chronicles 17:20)

***Anigu waxaan ahay kan ugu horreeya, kan ugu dambeeya, Ilaaha keliya; Ilaah kale ma jiro aniga mooyaane.*** (Isaiah 44:6)

***Ilaah kale ma jiro. "Dadka adduunka oo dhanow ii soo laabtoo badbaada helaa! Ilaah kale oo aniga hayn ma jiro. Ballankaygu waa run, weligiina isma beddeli doono. Waxan ku dhaartay magaca aan leeyahay in qof walba ii jilbo jabsan doono".*** (Isaiah 45:21-23)



# Ilaaha Kaliya ee Runta ah ee ku xusan Baybalka Qaybtiisa Cusub (New Testament) waa

***Markaasaa nin u yimid oo ku yidhi isaga, Macallin wanaagsanow, maxaan sameeyaa si aan nolosha weligeed ah u helo? Markaasuu (Ciise) ku yidhi ninkii, Maxaad ii leedahay wanaagsanoow? Mid wanaagsan ma jiro Ilaah mooyaane.*** (Matayos 19:16-17)

***Nolosha weligeed ah waxay ku jirtaa garashada inaad tahay Allaha keliya ee runta ah, iyo inay ogaadaan Ciise Masiix, kii aad soo dirtay.*** (John 17:3)

***Caabud Ribbiga Ilaahaaga oo u adeeg keligii! (Matayos 4:10)***

***Ciise ayaa ku jawaabay, "Amarka ugu horreeya oo dhan waa: Maqal, Israa'iilow; Rabbiga Ilaahayaga ah waa Allaha keliya: Waxaadna jeclaan doontaa Rabbiga Ilaahaaga ah adigoo ku jeclaanahaya qalbigaaga oo dhan, naftaada oo dhan, maskaxdaada oo dhan, iyo xoogaaga oo dhan; kani waa amarka koowaad. Kan labaadna, Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada. Amar ka weyn kuwaan majiro*** (Markos 12:29-31)

***Markaasaa qoraalkii sharciga ahi ku yidhi isaga, Hagaag, Macallinow, waxaad sheegtay xaqiiqada: waayo, Ilaah keliya ayaa jira; lamana jiro mid isagoo kale ah.*** (Markos 12:32)

***Waayo, Ilaahay waa hal, wuxuuna leeyahay rusul badan oo uu soo diray dadka, waxana ka mid ah Ciise Masiixi oo bashar ah.*** (1 Timoteyos 2:5)

***Ciise ayaa ku jawaabay, "Sunnaha iyo wax aan dadka baranayo maaha kuwa aan leeyahay. Waa mid ka yimid midka i soo diray".*** (John 7:16)



# Ilaaha Kaliya ee Runta ah ee Qur'aanka Kariimka ah

***"Iyo Allaha adiga ku abuurtayba waa Isla Hal Ilaah. Ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro isaga mooyaane, waana Naxariis Badanaha, Raxmaanka ah."*** (2:163)

***Waxaad dhahdaa (Nabiyow): "Alle waa kali (wehelna ma leh). Waana sayid dhammaystiran (oo deeqtoon). Alle wax ma dhalin, isna lama dhalin. Wax la mid ahna ma jiro."*** (112:1-4)

***"Ma jiro Ilaah kale oo aan Aniga ahayn, sidaas darteed I caabuda."*** (21:25)

***"Xaqiiqdii, Ilaahaagu waa Mid keli ah."*** (37:4)

***"Ma jiraa Ilaah kale oo Ilaahay la jira? Ilaahay wuu ka sarreeyaa wax kasta oo ay u shariik yeelaan."*** (27:63)

***"Kaasina waa Ilaahay, Rabbigiinna; ma jiro Ilaah kale isaga mooyaane, Abuuraha wax walba ee caabuda Isaga. Isagu waa Maamulaha wax walba."*** (6:102)

***"Dadka lama farin inay caabudaan Ilaahay keliya mooyaane; mana jiro Ilaah kale oo aan Isaga ahayn. Wuxuu ka sarreeyaa waxa ay ugu shariik yeelaan."*** (9:31)



Masjidka nabiga, Madina, Sacuudi carabiya

# Gabagabada

Nabiyada iyo Rususha Ilaahay dhammaantood – Aadan, Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise, iyo Muxammad (NNKH) – waxaa soo diray Ilaah kaliya oo ah Ilaahay, Abuuraha, si ay u gudbiyaan farriin isku mid ah:

**Ilaaha runta ah, waa kaliya HAL: Caabud Ilaahay KELIGIIS.**

Dhab ahaantii, dhammaan nabiyada iyo Rusushu waxay faafiyeen hal farriin oo isku mid ah, sidaa darteed, diintoodu waxay ahayd mid kali ah – Diinta Islaamka! Haddaba, maxay ahayd diinta Nabiyadaas iyo Rusushaas?

U-hogaansanaanta doonista Allaah (SW) ayey ahayd asaaska farriintooda. Ereyga ***'HOGAANSAMIDA'*** wuxuu qeexayaa macnaha ereyga' ***Carabiga ah ee 'Islaam;***

Qur'aanku wuxuu caddeeyaa in ***'Islaamku'*** yahay diinta xaqa ah ee Aadan, Xaawa, iyo faracooda ilaa Maalinta Qiyaamaha.

Ugu dambayntii, si aan badbaado u helno, waa inaan si ikhtiyaari ah oo qalbi-furan ku aqbalno oo u rumaysanno farriinta kor ku xusan. Laakiin tani keliya kuma filna! Waa inaan sidoo kale rumaysanno dhammaan Nabiyada dhabta ah ee Ilaahay (oo uu ka mid yahay Nabi Muxammad, NNKH) oo aan raacno diintooda saxda ah, hanuunkooda, iyo sunnahooda.

**Tani waa albaabka nolosha farxadda ee joogtada ah!**



# Sharaxaada Magacyada Waaweyn ee Islaamka

**Allaah:** Ereyga Carabiga ee Allaah waa magaca gaarka ah ee Ilaaha Keliya ee Runta ah, Abuuraha. Islaamku wuxuu barayaa in Ilaahay yahay Ilaaha runta ah ee dhammaan bini'aadamka.

**Muxammad:** Nabi Muxammad (NNKH) waa Nabigii ugu dambeeyay ee Ilaaha Keliya ee Runta, Allaha Abuuraha ah, uu u soo diray Ummadda. Nabi Muxammad wuxuu amrayaa dadka oo dhan inay Ilaah keliya caabudaan.

**Islaamka:** U hogaansamidda doonista Ilaaha Keliya ee Runta ah, Ilaahay.

**Muslim:** Qofka u hogaansama doonista Ilaaha Keliya ee Runta ah, Ilaahay.

**Qur'aanka Sharafta Leh:** Hadalka ugu dambeeyay ee Ilaahay, Ilaaha Keliya ee Runta ah. Waxaa lagu soo dejiyey Nabi Muxammad (NNKH).

**Masjidka (Masjid):** Meel nadiif ah oo lagu tukado oo inta badan Muslimiinta u adeegsadaan saaladda iyo cibaadada.


ALLAH oo ku qoran Carabi


Muxammad oo ku qoran Carabi


Qur'aanka Sharafta Leh


Muslim baryaya ALLAH (Ilaaha runta ah)

# Ma xiisaynaysaa inaad wax dheeraad ah sii ogaato?

Haddii aad xiisaynayso inaad ogaato macluumaad iyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan Islaamka, fadlan booqo shabakadayada:

**www.discoveritsbeauty.com**

## Taxanaha Lagu Soo Bandhigayo Quruxda Islaamka:

**1. Kaliya Tallooyinka Aysbaaga**

**2. Diinta Aadam Iyo Xaawo**

**3. ABC-yada Islaamka**

**4. Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha**

**5. Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay**

**6. Waxyigii Ugu Dambeeyay**

**7. Rasuulkii Ugu Dambeeyay**

## Shabakado Islaaml Ah Oo Faa'Ildooyin Badan Leh:

http://www.allahsquran.com

http://www.quranexplorer.com

http://www.islamhouse.com

http://www.edialogue.org

http://www.islamreligion.com

http://www.newmuslimguide.com

http://www.guidetoislam.com/en/

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay”.

Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:

أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا رسول الله

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.






GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM

Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب دين آدم وحواء باللغة الصومالية